The Washington State
# BOARD OF EDUCATION

**Waxyaabaha ku saabsan Gudiga**

## Waxaan qaabeynaa xeerarka oo aan u doodnaa nidaamka waxbarashada K-12 dadweynaha goblka.

**HADAFKEENA** waa u diyaarinta **nidaamka waxbarashada K-12 ee loo simmanyahay iyo loo dhanyahay** oo fulliya **HIMILADEENA** ee **arday walba oo lagu xoojiyay cilmi iyo xirfadaha ay ugu baahanyihiin inay ku kobciyaan caalamka isbadelayo.**

Waxaan ka shaqeynaa ku **ogaanshaha hadafkeena** iyada oo loo adeegsanayo

- ***La shaqeynta iskaashatada***
- ***Hormarinta xeerka hal abuurka***
- ***U doodista badelka wax ka badelka***

**HABRAACA**

Waxaa naga go'an ka qeybgelinta ardayda, qoysaska, iyo bulshooyinka gobolkoo dhan qaabeynta xeerka waxbarashada, oo leh xoog saaris gaar ah oo lagu qiranayo codadka kuwa aanan si fiican loogu adeegin nidaamka waxbarashada. Waxaan u dhaqaaqeynaa dhinaca qaabka wada shaqeynta meesha xeerarka loo naqshadeeyo iyadoo la kaashanayo bulshooyinka aan u adeegno.

Waxaan nahay 16-guddiga xeerka xubinta oo ay taageeraan shaqaalaha 12. Xubnaheena waxaa ka mid ah labo arday, Kormeeraha guud ee Waxbarashada Dadweynaha, wakiil dugsiyo gaar ah, shan xubnood oo ay doorteen agaasimayaasha guddiga dugsiga, iyo todoba xubnood oo ay magacaabeen Duqa magaalada.

**Saraakiisha**


Bill Kallappa
**Guddoonka**


Mary Fertakis
**Guddoon Ku xigeen**


Harium Martin-Morris


Dhaqtar Dana Riley Black


Patty Wood

**Ardayda**


Donalda Brantley


Castulo Gonzalez


Chris Reykdal
Kormeeraha guud ee Waxbarashada Dadweynaha


Ryan Brault


Brooke Brown


Jan Brown


Dhaqtar Angela Griffin


Ron Mabry


Dhaqtar Paul Pitre


Dhaqtar Susana Reyes


Kevin Wang

***Dhammaan Xubnaha Guddiga laga bilaabo 6/2024**

- **Horyaalka Loo dhanyahay iyo Waxbarashada Simman**
  *Hubso in arday walbaa uu helo fursada iyo taageerada ay ugu baahanyihiin inay ku koraan kuna kobcaan.*

- **In la sharfo Quruxda Arday Walba**
  *Qiyamka kala duwanaanshaha wuu xoojiyaa iyo asalada kala duwan ee arday walba.*

- **Samee Jawiyo Waxbarasho oo Diirada saarto Xiriirada**
  *Kobcinta ixtiraam guud, ka mid ahaansho, iyo farxad.*

- **Waxbarashada Gaarka ah ee Arday Walba**
  *Caqabada iyo taageerada arday walba si u hormariyo fikir adag iyo xirfadaha dhibaato xalinta.*

- **Dhisida Xiriiro Xoogan iyo Xiriirada Bulshada**
  *Jaalka iyo qoysaska si ay u abuuraan fursado cusub oo ku dartaa taariiqo kala duwan, aqoonsiyo, iyo waayo aragnimo.*

- **Taageerida Hormarinta Guud**
  *Kobcinta fayo qabka ardayga iyo kobaca waxbarashada.*

- **Muuji Aqoonsiyo Kala duwan oo Waxbarashada**
  *Hubso manhajka in loo dhanyahay oo dhaqan ahaan ka jawaabo, xoojinta ardayda inay wax ka qabtaan caqabadaha bulshada.*

- **Sare u qaad Waxbarashada Quseyso oo Ka qeybgal leh**
  *Sameey tusmooyinka waxbarashada gacan ku oolka ah iyo quseyso caalamka dhabta ah.*

Iyadoo lagu sharfayo balanqaadkeena aan kula shaqeyneyno bulshooyinka, qorshaha xeeladeena wuxuu qaadaa wado ka duwan qaababka caadiga ah. Badelkii diirada la saari lahaa natiijooyinka horay loo go'aamiyay, waxaan mudnaanta siineynaa ka qeybgelin dhab ah, soo bandhigida su'aalo iyo hal abuuro lagu sahminayo oo ay wehliyaan jaalalkeena. Qaabkaan wuxuu hubiyaa in dadaaladeena ay sheegeyso baahiyaha kala duwan ee bulshadeena waxbarashada, taasoo diirada saareyso gaar ahaan waxa aan ku sameyn karno aagageena maamulka. Iyadoo loo marayo diirad saarida xeeladeysan iyo ka qeybgelinta dhabta ah, waxaan rajeyneynaa inaan abuurno nidaamka waxbarashada K-12 ee loo simmanyahay iyo loo dhanyahay halkaasoo arday walba lagu xoojiyo aqoonta iyo xirfadaha ay u baahanyihiin si ay ugu kobcaan caalamka isbadelayo.

## U doodista iyo Kormeerka Xeelada ee Waxbarashada Dadweynaha

**Hadafka:** Sinnaanta waxbarashada horyaalka

**Xeelada:** Sharciyada sawirka iyo udoosita mudnaanada sharciga



**Ajendaheena 2024 – 2028 waxaa ka mid ah:**

- Sii joogteynta u doodista mudnaanada aasaaska: Hormarinta sinaanta waxbarashada halka arday walba helo taageerada ay u baahanyihiin. | U qoondeynta maalgelinta sida ku saleysan baahiyaha ardayga. | Waxbarashada gaarka ah iyo taageerada hab dhaqanada ka mid nooqshada sida buuxdo loo maalgeliyay. | Maalgelinta xeeladaha cadeynta ku saleysan ee barashada soo kabashada. | Hormarinta fayo-qabka ardayga iyo jawiga waxbarashada taageerada leh. | Bixinta helitaanka siman ee fursadaha quseeyo iyo waxbarashada ka qeybgelinta leh.
- Hormari bogga sharciga sannadlaha: Kor u qaadida mudnaanada muhiimka ah ee tixgelinta sharciga, kobcinta ka qeybgelinta bulshada ee hormarinta madasha.

## Qalinjabinta Dugsiga Sare iyo Heerarka Waxbarashada

**Hadafka:** Ku xooji ardayda ee cilmiga muhiimka iyo xirfadaha

**Xeelada:** Hormari sharuudaha qalinjabinta iyo ogeysii dib u eegida heerarka waxbarashada gobolka



**Ajendaheena 2024 – 2028 waxaa ka mid ah:**

- Naqshadeey qaab dhismeedka sharuudaha qalinjabinta FutureReady: Qaado habraac dhameystiran

u hormari qaabdhismeedka la hagaajiyay oo la xoojiyey ee shuruudaha qalin jabinta taasoo awood u siisa ardayda aqoonta iyo xirfadaha muhiimka ah. [Sebteembar, 2024 Codsiga Miisaaniyada, Dis. 2025 Wargelinta, Seb. 2026 Codsiga Sharciga]

- U samee fursado badan oo waxbarashada Dhaqanka Ka jawaabto iyo ku saleysan Barashada Waarta (sidoo kale loo yaqaan Waxbarashada Kartida ku saleysan): Qaababka waxbarashada wax ka beddelka, taageer mashaariicda bandhiga, iyo hormarinta kheyraadka higrelinta gobolkoo dhan. [Diseembar 2025 Wargelinta Sharciga]

- Hormari Dugsiga Sare iyo Qorshaha Ka baxsan: Kor u qaad qorsheynta gaarka ah, taageer dooqa ardayga, oo fududeey u diyaarinta marinada dugsiga sare kadib. [Agoosto 2025 Wargelinta Sharciga]

## Waxbarashada Aasaaska

**Hadafka:** Taageer guusha Hadafyada ee Waxbarashada Aasaasiga ah

**Xeelada:** Hubinta degmooyinka dugsiga inay daboolaan sharuudaha waxbarashada ugu muhiimsan



**Ajendaheena 2024 –2028 waxaa ka mid ah:**

- Waxay u suurtogelisaa dugsiyada inay bixiyaan waxbarashada oo qaabab kala duwan oo lagu taageerayo baahiyada ardayda: Aqoonso xadeynada, hal abuurada dhiiro gelinta, oo sare u qaad qaababka waxbarashada ardayda xudunta u ah.

## Caafimaadka Nidaamka Waxbarashada, La xisaabtanka, iyo Aqoonsiga

**Hadafka:** Taageer caafimaadka guud ee nidamka waxbarashada

**Xeelada:** Dajinta iyo kormeeritaanka hadafyada la xisaabtanka oo aqoonso guulaha.



**Ajendaheena 2024 – 2028 waxaa ka mid ah:**

- Balaarinta nidaamka dugsiga iyo la xisaabtanka oo lagu darayo sharuudaha waxbarashada: Ururinta xogta kheyraadka, cimilada dugsiga, iyo sharuudaha kale si markaas si fiican loogu qeexo tayada jawiyadeena waxbarashada oo loo taageero hormarin joogta ah ee waxbarashada K-12. [Diseembar. 2024 iyo 2026 Wargelinada Sharciga]

- Hormari dugsi aad u simman iyo nidaamka aqoonsiga degmada: Dib u eeg sharuuda aqoonsiga, ku dar jawaab celinta bulshada, oo wadaag dhaqamada ugu fiican oo waxbarashada simman.

# Boga Qalinjabinta

Sida waafaqsan hamiladeena ee ardaydoo dhan si ay u bartaan cilmiga iyo xirfadaha ay ugu baahanyihiin inay ku kobcaan caalamka isbadelayo, Guddiga Waxbarashada Gobolka Washington (Washington State Board of Education) waxay ku faraxsanyihiin inay u qaataan Boggaa Qalinjabinta Gobolka Washington sida qeyb muhiim ka ah qorshaheena xeelada 2024-2028.

Waxaa hormariyay Kooxda Shaqada Waxbarashada ku saleysan Xifdinta, iyo taageerada ka imaaneyso Guddiga iyo tallada qiimaha leh ee daneeyayaasha bulshada, **Boga Qalinjabinta waxay tilmaameysaa cilmiga muhiimka ah, xirfadaha, iyo awoodaha ardaydeena waa inay ku hormaraan inta lagu jiro xaalada safarkooda waxbarashada K-12.**

Boga wuxuu dhisaa aasaaska maadada muhiimka ah ee cilmiga ku saleysan oo waxaa lagu xoojiyaa iyadoo la tilmaamayo hormarinta xirfadaha casriga ah sida fikirka muhiimka ah, isgaarsiinta, wada shaqeynta, dhibaato xalinta, hal abuurka, iyo naxariista. Boga wuxuu u adeegaa sida hagaha iyo aalada lagu hormarinayo tayada guud ee waxbarashada, iyadoo la hubinayo in ardaydeena ay hormariyaan ma ahan kaliya cilmiga ay u baahan yihiin, laakiin sidoo kale awoodaha lagu qaadanayo, ka wada shaqeeyaan, oo hormaraan caalamka isbadalayo.

Qorshaha xeelada guddiga 2024-2028 wuxuu ku adkeeyaa balan qaadkeena lagu isticmaalo Bogga oo dadaaladeena lagu hormarinayo nidaamka waxbarashada, oo ay wehliyaan hamiladeena iyo qiyamyada. Ujeedadeena ayaa ah hubinta in qeyb walba oo nidaamkeena waxbarashada, ee waxa ardayda bartaan sida aan u cabirno hormarkooda oo ay kala qeybgalaan bulshadeena, aan isku aadino waxa aan aaminsannahay inay muhiim u yihiin ardayda inay ku kobcaan mustaqbalka.

## Boga Qalinjabinta

### Hadafyada Waxbarashada Aasaasga ah:

- Isgaarsiin wax ku ool ah oo habab badan ah iyo codsiga dhageystayaasha badan
- Ku dabaqitaanka fikradaha iyo mabaadi'da tacliinta kala duwan ee muhiimka ah
- Sababynta muhiimka ah iyo hal abuurka iyo xalinta dhibaato
- Qorsheynta iyo ku dhaqmida nolosha iyo masuuliyadaha

(Fiiri Xeerka Washington ee Dib loo Eegay (Revised Code of Washington, RCW) 28A.150.210)

**Waxay kobcisaa Koriinka iyo Cilmiga Shakhsiga**

*Muujiyo kalsooni Isticmaalo waxbarashada Dajinta hadafyada yoolalka micneynta shakhsiga*

**Waxay xaliyaan Dhibaatooyinka**

*Waxyaabaha sida adag u Muujiyo adkeysi Qaata hal abuurka*

**Waxay u xiriiraan si Wax ku ool ah**

*Waxay ku shaqeeyaan koox Kala shaqeeyaan Kormeeraan qilaafka*

**Waxay Joogteeyaan Fayo qab**

*Waxay kobciyaan fayo qabka jireed iyo dareen Waxay kobciyaane naxariis Waxay dhisaan xiriiro*

**Waxay Qaataan Kala duwanaanshaha /Kala duwanaanshaha**

*Waxay ka qeybqaataan bulshada Waxay sare u qaadaan Masuuliyada caalamka Waxay muujiyaan kartida shaqanka*

**Waxay Bartaan Xirfadaha Nolosha/ Is-abaabulka Shakhsi ahaaneed**

*Waxay qaataan hindise Waxay fahmaan maaliyada iyo farbarashada dhijitaalka Helitaanka kheyraadka*

### Ujeedada Dibloomada:

Ardayda waxay diyaar u yihiin guusha ee:

- Waxbarashada dugsiga sare kadib shaqada
- Faa'idada leh
- Ka qeybgelinta rayidka

Oo waxay ku qalabeysanyihiin xirfadaha lagu noqdo bartayaal waara.

(Fiiri RCW 28A.230.090)

The Washington State
**BOARD OF EDUCATION**

# Halbeegyada

Adeega qorshaheena xeelada 2024-2028, State Board of Education waxaa ka go'an inay kormeeraan, soo wargeliyaan, oo ka jawaabaan labo nooc oo qiyaasaha: 1) qiyaas oo fuliiso waajibaadkeena sharciga si loo kormeero nidaamka caafimaadka gobolkoo dhan iyo 2) hormarka kormeerida qiyaasaha haya Guddiga kala xisaabtami karo hormarinta hal abuuradeena xeelada.

## Tilmaamayaasha Nidaamka Waxbarashada Caafimaadka

Guddiga Waxbarashada Gobolka ayaa masuul ka ah hirgelinta “qaab dhismeedka la xisaabtanka heerarka ku saleysan” ee ku taageero dugsiyada inay wanaajiyaan guusha waxbarashada ardayga (RCW 28A.305.130).

Sida qeyb ka ah waajibaadkeena, waxaan kormeernaa “tilmaamayaasha nidaamka waxbarashada caafimaadka” kaasoo lagu qoro sharciga gobolka (RCW 28A.150.550). Tilmaamayaashaan waxay bixiyaan aragtida nidaamkeena waxbarashada ee caafimaadka guud, iyadoo qiimeyneyso hormarka ku aadan natiijooyinka horay loo qeexay.




| Tusmada | Sidee ayaa loo cabiraa | Xogta ugu Damabaysa | Boqolayda |
|---|---|---|---|
| U diyaarsanaanta Dugsiga barbaarinta | Boqolayda ardayda muujisaa sifooyinka lagu galayo dugsiga barbaarinta oo dhammaan lixda qeyb ee Liiska Hormarinta Xirfadaha Dugsiga Barbaarinta Washington (Washington Kindergarten Inventory of Developing Skills, WA KIDS) | 2024 | 52.5% |
| Wax Akhrinta ee Fasalka 4aad | Boqolkiiba Kulanka ardayda ama Dhaafitaanka heerka qiimeynta akhrinta gobolkoo dhan ee Fasalka 4aad | 2023 | 49.0% |
| Xisaabta fasalka 8aad | Boqolayda ardayda Dabooleyso ama Dhaafeyso heerka ee qiimeynta xisaabta Fasalka 8aad ee gobolkoo dhan | 2023 | 32.3% |
| Heerka Qalinjabinta Dugsiga Sare | Boqolayda ardayda qalin jabineyso iyagoo isticmaalayo Waqtigeeda (4-Vear) heerka qalinjabinta kooxda la hagaajiyay (Adjusted Cohort Graduation Rate, ACGR) | Fasalka 2023 | 83.6% |
| U diyaargarowga Shaqada koorsada Kulliyada | Boqolayda ardayda qalin jabinta dugsiga sare ee ka diiwaangashan machadyada dadweynaha dugsiga sare kadib oo aan u baahneyn inay qaataan koorsooyinka kulliyada ka hor ama xalinta Ingiriiska ama xisaabta | Fasalka 2021 | 92.0% (4-sanno)<br>78.0% (2-sanno) |
| Ka Qeybgalinta Dugsiga Sare Kadib | Boqolayda ardayda qalinjabinta ee ka diiwaangashan waxbarashada dugsiga sare kadib, tababarka ama ka shaqeeyo rubacyada 2aad iyo 4aad qalinjabinta kadib | Fasalka 2019 | 78.7% |

Bartilmaameedka 2029 oo tilmaame walba waa 90%

**Jiheynta Mustaqbalka**

Sida qeyb ka ah qorshaheena xeelada 2024-2028, Gudiga wuxuu sahminayaa qaababka lagu xoojiyo qaab dhismeedka la xisaabtanka iyadoo la balaarinayo baaxada nidaamka tilmaamayaasha caafimaadka si loogu daro sharuudaha waxbarashada, sida kheyraadka iyo cimilada dugsiga. Ujeedada ayaa ah bixinta sawir cad oo jawiyadeena waxbarashada iyo taageerida hormarinada joogtada ah ee waxbarashada K-12.




## Qiyaasaha lagu Kormeerayo Hormarka Guddiga

Sida waafaqsan qorshaheena xeelada ee diirada saaraya u wareejinta ka qeybgelinta bulshada dhabta ah iyo qaabeynta xeer iskaashi ah, cabirrada soo socda ayaa loo qorsheeyay si loo qabto nidaamka iyo dadaalka la geliyey kobcinta ka qeybgelintaan.

### Ka qeybgelinta Bulshada iyo isgaarsiinta

Meesha ku haboon, qiyaasahaan waxaa lagu kala saarayaa jinsiyada/qowmiyada, daqliga, doorka, iyo/ama gobolka

- **Gaarista:** Dhacdooyinka la qabtay, janalada isgaarsiinta ee la adeegsaday, iyo dhageystayaasha la gaaray.
- **Ka qeybqaadashada:** Tirada xubnaha bulshada ka qeybgalay.
- **Aragtida:** Sahanka ka qeybgelinta kadib ee lagu aruurinayo jawaab celinta xubnaha bulshada ee dadaalada ka qeybgelinta Guddiga.

### Hormarka iyo Dhameystirka

- **Jawaab celin leh:** Jawaab waqtiyeysan oo dhameystiran oo weydiimaha.
- **Halbeegyada mashruuca:** Daboolida guulaha hindisayaasha qorshaha xeelada.
- **Masuuliyadaha gudiga:** Dhameystirka wakhtiyaysan oo shaqooyinka waajibka ah.

### Mudnaanada Guddiga iyo Isticmaalka Illaha

- **Wakhtiga ajendaha:** Tirada sheeyada ajendaha ee lagu qoondeeyay mudnaan walba.
- **Aragtida mudnaanada:** Sahanka kulanka kadib iyo qiimeynta shaqsiga Guddiga sannadlaha ee waxtarka guddiga oo ku xiran qiyamyada.
- **Mudnaanada miisaaniyada:** Kheyraadka gudiga waxay waafaqsan yihiin mudnaanada xeelada qorshaha.